HM Government

# Dib u geeista SEND: taageerada saxda ah, goobta saxda ah, waqtiga saxda ah

Dukumiintiga soo koobaya

**Soomaali**



**Dib u eegista SEND: taageerada saxda ah, goobta saxda ah, waqtiga saxda ah**

**Wadatashiga Dowladda ee Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah iyo Naafanimada oo loo yaqaano (SEND) iyo nidaamka adeeg-bixinta kalea oo loo yaqaan (AP) ee England (Maarso 2022)**

## Dukumiintiga soo koobaya

Dowladda waxaa ka go'an in ay kor ugu soo wada qaado fursadaha dhammaan caruurta iyo dhallinyarada – iyada oo aan la kala reebin. Waxaanu hami-sare ugu haynaa caruurta iyo dhallinyarada leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah iyo naafanimada (SEND) sida aan ugu hayno ile kasta oo kale. Dib u eegista SEND wuxuu qeexayaa soo jeedinta dowladda ee nidaamka siinaya caruurta iyo dhallinyarada fursad ay ku hormaraan, iyaga oo helaya taageerada saxda ah, goobta saxda ah iyo waqtiga saxda ah, si ay u gutaan ilaa iyo heerka u sareeya ee ay gaadhi karaan, kuna noolaadaan nolol gaan-gaadh oo farxad, caafimaad iyo wax soo saar ah.

Dib u habeynta lagu sameeyey nidaamka SEND ee la soo bandhigey 2014 ayaa lahaa hammi sax ah tan iyo markaas waxaa jirey wax badan oo loo dabaaldego. Waxaa cad in nidaamka uu yahay mid ay wadaan shaqaale hawlkar ah oo dadaal badan. Si kastaba ha ahaatee, inkasta oo ay jiraan tusaalooyin ku-dhaqan wanaagsan leh, marar badan waaya-aragnimada iyo natiijooyinka carruurta iyo dhallinyaradu waa kuwa liita. Waalidiinta iyo daryeelayaasha ayaa ka niyad jabsan in ay maraan nidaam sii adkaanaya oo qalafsan Cadaadiska sii kordheysa ee nidaamka oo dhan waxay keenaysaa dib u dhac ku yimaada helitaanka taageerada iyo kordhidda caqabadaha maaliyadeed ee dawladda hoose.

Dib u eegista SEND ayaa ah ka fal-celinta aqoonsiga baahsan ee nidaamku ku guuldareystay inuu adeeg siiyo carruurta, dhalinyarada iyo qoysaskooda. Mudadii ay socotay dib u eegista, waxaanu dhagaysanay dadyow kala duwan, oo ay ugu muhiimsan yihiin caruur, dhalinyaro iyo qoysaskooda. Markii dib u eegistu ay socotey waxaa caddaatay in nidaamka adeeg-bixinta kale si ka sii badan loo isticmaalayey si loogu kabo nidaamka SEND Sidaa darteed, waxaanu eegnay caqabadaha gaarka ah ee horyaala qaybta nidaamka adeeg-bixinta kale, waxaanan soo jeedinay xalalka suurtagalka ah, iyada oo qayb ka ah Dib-u-eegistan.

**Dib u eegistu waxay aqoonsatay saddex caqabadood oo muhiim ah oo soo food saaray nidaamka SEND iyo AP:**

- Wadidda nidaamka SEND iyo adeeg-bixinta kale ma aha waayo-aragnimo wanaagsan oo loogu talagalay carruur badan, dhallinyaro iyo qoysaskooda
- Natiijooyinka carruurta iyo dhalinyarada leh SEND ama adeeg-bixinta kale ayaa si joogto ah cabbir kasta ugaga xun dhiggooda
- In kasta oo ay jirto maalgelin sii socota oo heer aan hore loo arag ah, nidaamku ma aha mid dhaqaale ahaan waara

**Wareegga xun ee wax ka qabadka dambe, kalsoonida hooseysa iyo qoondaynta kheyraadka oo aan waxtar lahayn**

Qoysaska iyo bixiyeyaasha labadaba, Dib-u-eegistu waxay ogaatay inay jirto is-waafaqid la'aan weyn oo ku saabsan sida baahiyaha loo daboolo, iyada oo go'aammada inta badan la gaaro iyada oo lagu saleynayo halka uu ilmuha ama qofka dhalinyarada ahi ku nool yahay ama uu wax ku barto, ee aan ku salaysnayn baahidooda. Wareeggani wuxuu ka bilaabmaa sanadaha hore iyo dugsiyada caadiga ah, halkaas oo in kasta oo la sameeyay dadaallada ugu wanaagsan, goobaha inta badan looma qalabaysan si loo aqoonsado laguna taageero carruurta iyo dhallinyarada. Qaab-wax-qabadka aan iswaafaqsanayn ayaa arinta uga sii daraya. Ma cadda qoysaska waxa ay tahay inay si macquul ah uga filayaan goobaha caadiga ah ee deegaanka, waxayna lumiyaan kalsoonida in goobahani ay dabooli karaan baahiyaha ilmahooda. Natiijo ahaan, Qorshayaasha Waxbarashada, Caafimaadka iyo Daryeelka (EHCPs) iyo, xaaladaha qaarkood, bixinta adeega takhasuska leh, ayaa loo arkaa habka kaliya ee lagu dammaanad qaadi karo taageerada saxda ah ee ku habboon.

Kordhidda tirada codsiyada EHCP-yada iyo bixinta adeega takhasuska leh waxay ka dhigan tahay in carruurta iyo dhallinyaradu ay la kulmaan dib u dhac weyn oo xagga helitaanka taageerada ah. Qaar ka mid ah carruurta iyo dhalinyarada, oo ay ku jiraan kuwa leh baahiyo iskudhafan, ayaa la kulma safarro dhaadheer si ay u aadaan dugsiga ama ay u galaan meelayn ka baxsan aagga xaafadooda, iyada oo ay arintani ka fogayneyso bulshada deegaankooda. Ilaha dhaqaalaha iyo awooda shaqaalaha waxay u jiidataa xaga adeega takhasuska leh ee nidaamka si ay u yaraato in la bixiyo wax ka qabadka hore iyo taageerada waqtiga ku haboon ee goobaha guud. Natiijadu waxay tahay, meertada xun waxay ku sii socotaa natiijooyinka iyo waayo-aragnimada carruurta iyo dhalinyarada oo ku sii socoda silica iyo kharashyada sii kordhaya.

**U beddelidda meertadan xun mid wanaagsan**

Badi carruurta iyo dhallinyaradu waa inay awoodaan inay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu horumaraan goobta caadiga ah ee deegaankooda, iyada oo aan la helin habab xafiiseed hawlo badan, ama baahida EHCP ama meelaynta bixinta gaarka ah ama beddelka ah. Waa in si degdeg ah loo ogaado baahiyahooda, iyada oo taageero ku habboon loo diyaariyey fursadda ugu horreysa Carruurta iyo dhallinyarada qaarkood, bixinta takhasuska leh ayaa noqon doonta meelaynta ugu habboon iyaga si ay u awoodaan inay wax bartaan oo ku guuleystaan. Waa inay awoodaan inay arintan ku helaan qabanqaabada ugu sahlan

Warqadda cagaaran waxa ay ka tashanayaan hindiseyaal hammi sare leh si loo helo isla jaanqaadsanaan heer qaran ah oo ku aaddan taageerada la heli karo, sida loo heli karo iyo sida loo maalgelinayo. Waxa ay dajinaysaa qorshayaal nidaam loo wada dhan yahay, laga bilaabo bixinta caadiga ah ee la wanaajiyey oo bixisa goor hore iyo si sax ah loo aqoonsiga baahiyaha, waxbarid tayo sare leh, iyo si degdeg ah u helista taageerada la beegsaday. Nidaam loo dhan yahay ayaa sidoo kale hubin doona in carruurta iyo dhallinyaradu ay waqti ku helaan adeegyada iyo taageerada takhasuska leh, oo ay ku jiraan meelayn khaas ah halka ay arintani ku habboon tahay. Arintan waxaa xoojin doona wax-soo-saarka wadajirka ah ee xooggan ee qoysaska iyo la xisaabtanka heer kasta, iyo hagaajinta xog ururinta si loo bixiyo sawir waqtiyeysan oo ku saabsan sida nidaamku u shaqeeyo.

**Hal SEND iyo nidaam adeeg-bixinta kale oo qaran**

Dib-u-eegiddu waxay soo gebogebaysay in baahi weyn loo qabo isla jaanqaadka sida baahiyaha loo garto oo loo taageero, si go'aannada loogu sameeyo iyada oo lagu salaynayo baahida ilmaha ama qofka dhallinyarada ah ee wax-soo-saarka wadajirka ah ee qoysaska, maaha meesha ay ku nool yihiin ama goobta ay xaadiraan. Waxaanu soo jeedineynaa in:

- **la sameeyo SEND cusub iyo nidaam adeeg-bixinta kale oo heer qaran ah oo dejinaya heerar qaran oo joogto ah** oo ku saabsan sida baahiyaha loo aqoonsaday oo loo daboolay marxalad kasta oo geedisocodka ilmaha ee xagga waxbarashada, caafimaadka iyo daryeelka. Waalidiinta iyo daryeelayaashu waxay ku kalsoonaan doonaan in baahiyaha ilmahooda si wax ku ool ah loogu dabooli doono goobta ugu habboon ee deegaanka. Waxa u kala caddaan doonta taageerada uu ilmahoodu helayo waxayna ku hawlanaan doonaan go'aan-qaadasho heer kasta ah.

- **la abuuro shuraako cusub oo maxalli ah oo SEND ah** oo isu keenta la-hawlgalayaasha waxbarashada, caafimaadka iyo daryeelka daryeelka iyo dawladda hoose si loo soo saaro **qorshe deegaanka ah** oo qeexaya sida deegaan kasta u buuxin doono heerarka qaranka. Marka taageero khaas ah loo baahdo, qorshaha ka mid noqoshada deegaanka ayaa dejin doona bixinta laga heli karo aagga deegaanka, oo ay ku jiraan cutubyo ka tirsan kuwa caadiga ah, nidaamka adeeg-bixinta iyo bixinta takhasuska.

- **taageero waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay u muujiyaan doorasho xog ogaal ah oo ku saabsan meelaynta ku habboon oo siinaya liis habaysan**, oo ay ku jiraan kuwa caadiga ah, takhasuska leh iyo kuwa madaxbannaan. Waalidiinta iyo daryeelayaashu waxay sii wadi doonaan inay helaan xaqa ay u codsadaan goobta caadiga ah ee ilmahooda.

- **soo bandhigno habraaca EHCP oo la habeeyey oo electroonik ah iyo qaab** si loo yareeyo hanaan-xafiiseedyada hawsha badan, loona bixiyo iyada oo joogta ah.

- **Casriyeyno hanaanka bedel-ugu-gudidda** si ay u fududaato in mar hore la xalliyo khilaafaadka, oo ay ku jirto dhexdhexaadin waajib ah, iyada oo maxkamadda lagu sii haynayo kiisaska ugu adag.

**Bixin heer sare ah laga bilaabo da'da hore ilaa qaan-gaarnimada**

Dib u eegista waxaa lagu maqlay in aanu u baahanahay nidaam waxbarasho oo loo dhan yahay si loo hubiyo in caruurta iyo dhalinyarada leh SEND loogu sameeyo qaab ay u horumaraan. Waxaanu:

- **kordhin doonaa wadarta maalgashiga miisaaniyada dugsiyada**, iyada oo la kordhinayo £1 bilyan sanadka 2022-23 si loo taageero caruurta iyo dhalinyarada qaba baahiyaha iskudhafan.

- **hagaajin doonaa bixinta caadiga ah**, dhisidda hamiga Dugsiyada dib-u-habaynta Warqadda Cad, iyada oo loo marayo tababarka macallimiinta iyo horumarinta heerka sare ah iyo harumarintabarnaamijka 'waxa shaqeeya' si loo aqoonsado, loona wadaago habka ugu wanaagsan oo ay ku jirto wax ka qabadka hore.

- dhisa doonaa khibrad iyo hogaamin, **anaga oo la tashanayna SENco National Professional Qualification (NPQ) cusub ee dugsiga SENCos,** oo ay weheliso kordhinta tirada shaqaalaha leh aqoonsiga SENco ee goobaha sanadaha hore.

- **ku maalgelin doonaa £2.6 bilyan**, saddexda sano ee soo socota, **si loo soo bandhigo meelo cusub oo loo hagaajiyo bixinta hadda jirta ee carruurta iyo dhalinyarada leh SEND** ama kuwa u baahan adeeg-bixinta kale. Waxaan soo bandhigi doonnaa dugsiyo cusub oo gaar ah iyo kuwo kale oo bilaash ah oo dheeraad ka ah60 oo horeba u soo socday.

- **dejin doonaa waqti cad oo ah in, ugu dambayn 2030, dhammaan carruurta iyo dhallinyaradu ka faa'iidaysan doonaan in wax lagu baro qoys dugsiyeed**, iyo dugsigooda, oo ay ku jiraan adeeg-bixinta khaaska ah iyo adeeg-bixinta kale ee kalsoonida xooggan leh ama leh qorshayaasha ku biirista ama samaynta, wadaagista khibradaha. iyo kheyraad lagu wanaajiyo natiijooyinka.

- **guddi u saari doonaa si loo fahmo taageerada carruurta iyo dhallinyarada leh SEND uga baahan yihiin shaqaalaha caafimaadka** si ay si cad diirada ugu saartaan SEND oo ku wajahan qorshaynta shaqaalaha caafimaadka.

- **maalgelin doonaa in ka badan 10,000 meelayn nasasho oo dheeraad ah oo aanu ku maalgelin doono £82 milyan isku xirka xarumaha qoyska** si carruur badan, dhalinyaro iyo qoysaskoodu ay u helaan taageero duuduub ah.

- **maalgelin doonaa 18 milyan ginni**, saddexda sano ee soo socota **si loo dhiso awooda Barnaamijka Layliga La Taageero**, iyo wanaajinta kala guurka ee waxbarashada sare iyada oo la soo bandhigayo Faylasha Wareejinta Guud oo ay weheliso tijaabinta bilaabidda hagaajinta baasabooradaa si loo hubiyo in dhalinyarada SEND ay diyaar u yihiin shaqo iyo waxbarashada sare.

**Door la habeeyey oo isku dhafan oo loogu talagalay adeeg-bixinta kale**

Markey ugu wanaagsan tahay, dugsiyada ah adeeg-bixinta kale ayaa ah khabiiro taageera carruurta iyo dhalinyarada uu hab-dhaqankooda ama baahiyahooda kale ay keeni karaan caqabad xagga waxbarashada Laakiin, inta badan doorka adeeg-bixinta kale ma cadda, waxaana loo adeegsadaa goor dambe ama qaab aan sida ugu wanaagsan diiradda loogu saarin baahiyaha carruurta. Si caqabadahan wax looga qabto, waxaanu soo jeedineynaa in:

- **laga dhigo adeeg-bixinta kale qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamyada SEND** ee maxalliga ah iyada oo u baahan iskaashatada SEND cusub si ay u qorsheeyaan oo ay u bixiyaan adeeg bixin ka duwan oo diiradda saaraya wax ka qabadka hore.

- **dugsiyada adeeg-bixinta kale la siiyo xasiloonida maalgelinta** si ay u bixiyaan adeega diirada saaraya wax ka qabadka hore iyada oo looga baahan yahay maamulada maxalliga ah inay abuuraan oo ay qaybiyaan miisaaniyad gaar u ah adeeg-bixinta kale.

- **la sameeyo qaab-hawleed ku habboon oo loogu talagalay adeeg-bixinta kale** kaas oo dejinaya heerar adag oo diiradda lagu saarayo horumarka, dib-u-dhexgalka waxbarashada caadiga ah ama meelo waara 16 sanno jirada ka dib.

- **la soo bandhigo kormeer iyo daah-furnaan ka ballaaran oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa** carruurta iyo dhallinyarada ee gelitaanka iyo ka bixista adeeg-bixinta kale.

- **la hirgeliyo baaqa loogu talagalay caddaynta**, ka hor xagaaga, oo ku saabsan isticmaalka adeeg-bixinta aan diiwaangashanayn si loo baaro qaab-waxqabadka jira.

**Doorarka nidaamka, isla xisaabtanka iyo dib u habaynta maalgelinta**

Dib u eegistu waxa lagu maqlay baahida loo qabo in la iswaafajiyo dhiirigelinta nidaamka iyo isla xisaabtanka si loo yareeyo hab-dhaqamada qalloocan ee keenaya natiijooyin liita iyo kharashaadka sare ee nidaamka hadda jira. Waxaanu soo jeedineynaa in:

- **la soo bandhigo cadayn ah doorarka iyo masuuliyadaha dhammaan bah-wadaagta, waxbarashada, caafimaadka, daryeelka iyo dawladda hoose** iyada oo loo marayo heerarka cusub ee qaranka. Iyada oo la raacayo isla xisaabtanka, qof kastaa wuxuu leeyahay dhiirigelinta saxda ah iyo kaaliyeyaasha si ay doorkooda u gutaan oo lagula xisaabtamo.

- **la qalabeeyo Kooxda Cusub ee Waaxda Waxbarashada ee Gobollada** si ay u qaataan mas'uuliyadda qabashada maamulka iyo sanduuqyada dhaqaale ee maxalliga ah, si ay u cadeeyaan u gudbinta carruurta iyo dhallinyarada ee SEND maxlli ah iyada oo la isticmaalayo heshiisyada maalgelinta cusub ee u dhexeeya dawladda hoose iyo Waaxda Waxbarashada.

- **la soo bandhigo tilmaan-haye (dashboard) cusub ee ka wadamid ahaanshaha looguna talagaley 0-25** oo siinaya sawir hufan oo waqtiyeysan oo ku saabsan sida nidaamku uga socdo heer degmo iyo heer qaran ee guud ahaan caafimaadka iyo daryeelka waxbarashada.

- **lagala shaqeeyo Ofsted iyo Guddiga Tayada Daryeelka (CQC)** si ay u keenaan qaab-dhismeedka Kormeerka ee Aagga Deegaanka oo la cusboonaysiiyay iyada oo diiradda la saarayo qabanqaabada iyo khibradaha carruurta iyo dhalinyarada leh SEND iyo adeeg-bixinta kale.

- **la soo bandhigo dib-u-habaynta maalgelinta iyada oo la soo bandhigayo qaab-dhismeed cusub oo heer qaran ah oo ku saabsan derajooyin iyo qiimaha maalgelinta**, oo ku habboon heerarka baahida iyo noocyada bixinta waxbarasho ee lagu dejiyay heerarka cusub ee qaranka. Bixiyeyaashu waxay yeelan doonaan caddaymo ku saabsan inta maalgelin ah ee ay tahay inay filayaan inay helaan si ay u bixiyaan taageero ama adeeg, iyada oo la hubinayo in qaab-dhismeedka qiimaha saxda ah ee jira, oo gacan ka geysanaya in la xakameeyo kharashyada badan ee loo aanaynayo adeeg-bixinta qaaliga ah.

**Bixinta Adeeg isbeddel u keenaya carruurta iyo qoysaska**

Daabacaada warqada cagaaran waxay calaamad u tahay bilawga geeddi-socod wada tashi 13 asbuuc ah, oo xirmaya 1da Luulyo 2022.  Waxaan ku dhiirigelinaynaa qof walba inuu dib u milicsado soo jeedinta ku qoran warqada cagaaran oo uu ka jawaabo la tashigayaga. Wada tashiga qoran waxaa barbar socda dhacdooyin taxane ah oo lagu uruurinayo aragtiyo dheeri ah oo gacan looga geysto wada tashiga guud.

Waxaan ognahay inay jiraan isbedello degdeg ah oo hadda la samayn karo si loo xasiliyo nidaamka hadda jira. Waxaan qaadaynaa tallaabooyin degdeg ah si aan u xasilinno nidaamyada SEND ee maxalliga ah iyada oo loo marayo Barnaamijka Badbaadada Valve iyo Barnaamijka Gaadhsiinta Qiimaha Wanaagsan. Soo jeedinaha lagu sheegay warqada cagaarka ah waxay la jaanqaadi doonaan dib-u-habayn ballaaran oo ku saabsan kor u qaadista, oo ay ku jirto siyaasadda lagu dejiyay Warqaddii dhoweyd ee Caddayd ee Dugsiyada (Schools White Paper), iyo sidoo kale Dib-u-eegista Madax-bannaan ee soo socota ee Daryeelka Bulshada ee Carruurta iyo dib-u-habeyn ballaaran oo lagu sameynayo muuqaalka guud ee caafimaadka iyo daryeelka.

Dabayaaqada sanadkan, ka dib marka la dhammeeyo wada tashiga, waxaanu daabici doonnaa qorshe oo SEND ah, oo dejinaya fl-celinta dawladda ee wada tashiga iyo sida loo hirgelin doono soo jeedinaha. Si wadajir ah, waxaan u hubin karnaa ilmo kasta iyo qof kasta oo dhalinyaro ah oo leh SEND iyo kuwa ku jira adeeg-bixinta kale inay horumaraan oo si wanaagsan ugu diyaar garoobaan nolosha qaangaarka ah.

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u eegista SEND soo booqo:** [**sendreview.campaign.gov.uk**](https://sendreview.campaign.gov.uk)